

Suurat Quraysh
سُورَةُ الْقُرَيْشِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Caadaysigii Quresheed.
2. Ay ka caadayeesheen Safarka Xa-gaaga iyo Jiilaalka darteed.
3. Ha u caabudeen Eebeha Beydkan (Kacbada).
4. Eebahii ka quudiyay gaajo, kana aamingaliyay cabsi.

لَا إِلَهَ إِلَّا قُرَيْشٌ ①

إِلَهُهُمْ رِحْلَةَ الشِّتَاءِ وَالصَّيْفِ ②

فَلْيَعْبُدُوا رَبَّ هَذَا الْبَيْتِ ③

الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَءَامَنَهُمْ

مِنْ خَوْفٍ ④

Eebe isagaa abuuray Dadka isagaana quudiya, halkanna wuxuu ku mannaystay oo xusuusiyay Quraysh-tii Ree Makaad siduu Eebe ugu nicmeeyay, taasoo ah inuu kulmiyay, baahina ka quudiyay, cabsina ka nabadgaliyay, si ay Eebe ugu mahad-naqaanna ay waajibtahay inay caabudaan, Ruuxii Eebe u nicmeeyana Shukrigedaa ku waajib ah. Rasuulkii Eebana «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee» wuxuu akhriyay Suuraddan markaasuu yidhi: magaciin Ba'qureysheey caabuda Eebaha Beydkan idinka quudiyay gaajo idinkana aamin yeelay cabsi. Quraysh (1-4).

Suurat Al-Maacuun
سُورَةُ الْمَاعُونِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ka warrama kan beenin Abaal-marinta (Qiyaamada).
2. Kaas xooga Agoonta (xaqeeda).
3. Aan kuna boorrinaynin quudinta miskiinka.

أَرَأَيْتَ الَّذِي يُكَذِّبُ بِالذِّكْرِ ①

فَذَلِكَ الَّذِي يَدْعُ الْيَتِيمَ ②

وَلَا يُحِصُّ عَلَىٰ طَعَامِ الْمِسْكِينِ ③

4. Waxaa halaag u sugnaaday kuwa tukan (waa Munaafiqinta).

فَوَيْلٌ لِلْمُصَلِّينَ ﴿٤﴾

5. Ee haddana halmaansan Salaad-dooda.

الَّذِينَ هُمْ عَنْ صَلَاتِهِمْ سَاهُونَ ﴿٥﴾

6. Dadkana is tusiyo.

الَّذِينَ هُمْ بِرِءَاؤِهِمْ ﴿٦﴾

7. Una diida alaabta (Laysugu kaal-meeyo).

وَيَمْنَعُونَ الْمَاعُونَ ﴿٧﴾

Abaalmarinta oo la beeniyo, Agoontoo la dhibo, Masaakiintoon wax lagu sadaqaaysanin, Salaaddoo layska hilmaamo, Dadkoo laystustusiyo iyo weelasha iyo kaalmadoo la ceshado waa arrimo xun xun oyna wanaagsanayn in loo dhawaado.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: «Ruuxii dadka maqashiiya» camalkiisa Eebana wuxuu maqashiiyaa khalqigiisa wuuna xaqiraa wuuna yareeyaa» Waxaa wariiyay Imaam Axmad. Al-Maacuun (1-7).

Suurat Al-Kawthar

سُورَةُ الْكَوْثَرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Annagaa ku siinnay Nabiyow Waadi Janno (iyo khayr badan).

إِنَّا أَعْطَيْنَاكَ الْكَوْثَرَ ﴿١﴾

2. Ee u tuko Eebahaa dartiis, waxna u gawrac.

فَصَلِّ لِرَبِّكَ وَأَحْسِرْ ﴿٢﴾

3. Ruuxii ku necebna waa mid cidhib beelay.

إِنَّكَ شَأْنُكَ هُوَ الْأَبْتَرُ ﴿٣﴾

Eebe wuxuu ugu nicmeeyay Nabigiisa Muxammad «ah Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee» Waadi Janno, wuxuuna Faray in shukri dartiis uu u tukado Salaaddana Daa'imo, waxna gawraco, wuxuuna u sheegay in Ruuxii la collooba uu Cidhib-beeli.

Ibnu-Cumar wuxuu yidhi: waxaa Eebe Nabiga siiyay Wabi ku yaal Jannada oo Labadiisa dhinac Dahab iyo Fiddo yihiin, oo Jowhar daadin, Biyihiisuna ka cadyihiin Caano, kana macaanyihiin Malab. Waxaa wariiyay Tirmidi. Al-Kawthar (1-3).